# Metro Mobility – waa adeeg gaadiid dadwaye oo loogu talagalay dadka naafada ah

Halkan waxa ku qoran waa macluumaad muhiim ah oo loogu talgalay dadka u baahan inay isticmaalaan adeegga gaadiidka dadwaynaha ee loogu talagalay dadka naafada ah. Macluumaadkan haddii aad akhrisato oo welina aad qabto wax su'aallo ah ama aad u bahaan tahay in qof si toos ah aad u la hadasho, fadlan xarunta adeegga ka soo wac 651.602.1111 ama 651.221.9886 (TTY). Waydiiso turjumaan ku hadla luqaddaada, sida adiga oo dhahaya "turjumaan af Soomaali" "Somali interpreter".

## Ku saabsan Metro Mobility

Metro Mobility waa gaadiid dadwayne oo loogu talagalay dadka qaba xaalad caafimaad daro ama dadka naafada ah oo aan isticmaali karin noocyada gaadiiidka kale ee dadwaynaha ama dhibaato ku qaba mararka qaarkood isticmaalka gaadiidka kale, sida basaska ku socod waddooyinka caadiga ama tareennada yaryar. Si Metro Mobility loo isticmaalo, dadka waa inay maraan hanaan loogu aqoonsannayo inay u baahan yihiin in adeeggan ay isticmaalaan.

Metro Mobility waxay isticmaalaan gaagiid ay saaran yihiin qalab gaar ah oo dadka ka caawinnaya inay fuulaan oo ayna dhaqaaqaan oo ayna ka degaan. Waa adeeg gaadiid oo la isla raaco, taas micnaheedu waxay noqon kartaa in ay dhici karto in dad kale aad dad kale aad isla raacdaan meesha aad u socoto ama meesha aad ka soo socoto. Darawaliinta adeegga waxay ku bixiyaan albaab-ilaa-albaab, tani waxay micnaheedu tahay gurigaaga ama dhismaha aad degan tahay albaabkiisa ayay kugu sugayaan oo ay kaa qaadayaan. Ka dibna, waxay ku geyn doonaan meesha aad u socoto oo aad rabto in aad aado albaabkiisa ayay ku geyn doonaan.

## Waa in aad ahaataa qof loo aqoonsado inuu raaci karo gaadiidka Metro Mobility

Sharciga dowladda federaalka ayaa sheegaya qofka loo ogol yahay inuu isticmaalo adeegyada Metro Mobility. Dadka ayaa guud ahaan u qalma haddii aysan karin inay isticmaalaan baska caadiga ama nidaamka baska jidka caadiga mara oo ay ku adag tahay isticmaalkooda. Mar haddii Metro Mobility ay xaqiijiso in aad isticmaalayso adeegga, waxay kuu samayn doonaan kaar aqoonsi oo aad isticmaali doonto goorta Metro Mobility aad isticmaalayso. Si aad wax badan uga ogaato hanaanka u qalmitaanka, Xarunta Adeegga Metro Mobility Service Center ka wac 651.602.1111 ama 651.221.9886 (TTY). (Waydiisa turjumaan luqaddaada ku hadla.)

## Raacitaanka waa in aad ballan u samaysataa

Metro Mobility waa adeeg la soo dalbado, taas waxay micnaheedu tahay waa in aad soo wacdaa oo aad soo codsataa gaadiid meel ku geeyo oo aad ballan soo samaysataa. Kuwa qabaya telfoonka su'aallo isku xig xiga ayay ku waydiin doonaan si ay u ogaadan halka aad doonayso in aad aado, goorta, haddii qalab aad isticmaasho marka aad meel aadayso iyo in

kale, haddii qaf ku daryeel oo ku caawiya aad isa soo raacaysaan iyo in kale, iyo haddii ballan aad leedahay oo aad u baahan tahay in aad la kulanto.

## Raacitaan ballan

Mar haddii laguu aqoonsado in aad isticmaasho Metro Mobility, waad qabsan ama samaysan kartaa ballan aad ku raacdo gaariga. Waxaa jira seddex meelood oo adeegga laga bixiyo, mid kastana waxaa laga bixiyaa adeeg gaar ah. Waxaad u baahan tahay in aad si toos ah u wacdaa adeeg bixiyaha saxda ah si ballan aad u samaysato in uu kuu yimaado qof ku qaado. Waxaad booqan kartaa www.metromobility.org si aad u geliso cinwaankaaga oo aad u ogaato adeeg bixiyaha aad u baahan tahay in aad wacdo. Sidoo kale Xarunta Metro Mobility Service Center waxaad ka wici kartaa 651.602.1111 ama 651.221.9886 (TTY) si aad u hesho kaalmo ah si loo go'aamiyo deegaankaaga adeegga laga bixiyo iyo si loo xaqiijiyo in adiga aad degan tahay aagga laga bixiyo adeegga Metro Mobility.

Ballanta raacitaankaaga waa in aad samaysataa ugu yaraan hal maalin ka hor, oo waxaad soo wici kartaa oo ballanta aad samaysan kartaa ugu yaraan afar maalmood ka hor ayaad horey u samaysan kartaa raacitaankaaga. Qofka telfoonka aad la hadlayso ayaa kaa caawin doona inuu sameeyo ballanta kuu qabto saacadda goorta baabuurka Metro Mobility uu ku soo qaadayo iyo goorta uu ku soo celinnayo iyo meesha adigu aad rabto in lagu geeyo. Waxaa muhiim ah in shaqsiga ballanta baabuurka kuu samaynaya in aad u sheegto haddii aad ballan ku socoto ama ballan muhiim ah aad leedahay oo aad u baahan tahay in wakhti fiican aad u baahan tahay in aad tagto.

## Lacagta

Rakaabka waxay bixinayaan $4.50 markiiba inta lagu jiro saacaddaha wadadu mashquul tahay (Isniin– Jimce, 6 a.m. ilaa 9 a.m. iyo 3 p.m. ilaa 6:30 p.m.) iyo $3.50 markiiba inta lagu jiro saacaddaha aan wadadu mashquul ahayn. Qiimo dhimic gaar ah ayaa jira inta lagu jiro feestooyin gaar ah qaarkood. Waxaa dhici karta in lagugu soo dalaco lacag badan haddii aad qaadato socdaal kaa soo ah in ka badan 15 meel in ka badan ah.

## Faahfaahin muhiim kale

**Waxay u badan tahay in gaadiidka aad la wadaagto dad kale in aad isla raacdaan.** Waxaa dhici karta in darawaliinta rakaabyaal kale ay soo qaadaan oo ay soo dejiyaan inta ay meesha adiga aad ku sii socota ku sii wajahan yihiin, laakin weli adiga meesha adiga aad ku socoto waa lagu geyn doonaa marka ballanta laguu qabtay laguu sheegey in lagu geynayo.

**Ballanta horey ayaad u qabsan kartaa si markaa horey aad u tagto meesha aad u socoto** haddii aad ka welweleyso in dib aad ugu dhaceyso wakhtigii lagugu qabtay meesha aad u socoto iyo in kale.

**Sabab kasta ayaad u isticmaali kartaa Metro Mobility.** Socdaal kasta isla si ayuu muhiim u yahay.

**Baabuurka boos ku filan oo adiga iyo qalabka aad isticmaasha idin qaada ayuu leeyahay.**Gaariga wuxuu leeyahay qalab kaa caawiya in gaariga aad fuusho oo aad ka degto adiga oo isticmaalaya qalabka ku caawinnaya ee aad isticmaasho. Goorta ballan aad u samaysato gaariga ku qaadi la'haa, waxaa lagu waydiin doonaa haddii aad isticmaasho qalab, si markaa ay u qorshayaan in ay kuu soo diraan baarbuur adiga laguugu talalgay oo sax ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah, Xarunta Metro Mobility Service Center ka wac 651.602.1111 ama 651.221.9886 (TTY). (Waydiisa turjumaan luqaddaada ku hadla.)

**Hal qof kale oo dheeraad ah ayaa markastaaba kula soo raaci kara.** Dad kale oo dheeraad ah waan ogolaanaa haddii baabuurka uu ka banaan yahay boos kale oo dheeraad ah. Iyaguna waa inay iska bixiyaan isla lacagta adiga aad bixisay.

**Wax lacag ah laga ma qaadayo carruurta ay da'doodu ka yar tahay 6 sano jirka** ee adiga kula socda. Haddii canuga uu u baahan yahay kursiga ilmaha, sida waafaqsan sharciga gobolka Minnesota adigu waa in aad la timaadaa kursiga oo waa in baabuurka aad ugu xirtaa. Darawaliinta loo ma ogola in carruurtu ay qaadaan oo ay baabuurtu soo saaraan ama ka dejiyaan goorta adiga iyo dadka kale ee kula socoda ay soo wadaan.

**Waxaad horey u soo wadan kartaa qof kaa kaalmeeya (personal care assistant (PCA) oo wax lacag ah aanu kugu kacayn** haddii kaalmo dheeraad ah aad u baahan yahay. Kaliya u sheeg qofka ballanta kuu samaynaya ee aad la hadlayso haddii qof kale uu ku soo raaci doono oo uu ku caawin doono.

**Markastaaba waad soo wadan kartaa xaywaanaadka adeegga iyo xaywaannaadka daaweynta oo waad soo saaran kartaa baabuurta Metro Mobility.** Xaywaannaadka waa in ay gacantaada ku jiraa inta socdaalka lagu jiro oo waa inay fadhiistaan ama seexdaan sagxadda adiga kuu dhow, oo ma ahan korsiga dushiisa.

Xarunta Adeegga ee Metro Mobility Service Center | 390 N. Robert Street | Saint Paul MN 55101 |
*www.metromobility.org*
Iimeel: metromobility@metc.state.mn.us | Teloon 651.602.1111| TTY 651.222.9886 | Fakis 651.602.1660